




(utan bilder)

✎ Lesley Koyi
🔊 Wiehan de Jager
📄 Abdi Muse
😊 somaliska
|| nivå 5



Magozwe



Sagor för barn på svenska

berattelser.se

Magozwe


Skreven av: Lesley Koyi
Illustrerad av: Wiehan de Jager
Översatt av: Abdi Muse

Denna saga kommer från African Storybook (africanstorybook.org) och vidarebefordras av Sagor för barn på svenska (<https://berattelser.se/>), som erbjuder sagor på många språk som talas i Sverige.

Detta verk är licensierat under en Creative Commons

[Erkännande 4.0 Internasjonal Licens.](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/deed.sv)


<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/deed.sv>




Gudaha magaaladda mashquulsan ee Nayroobi, ee ka fog daryeel nolol ee guriga, waxaa ku noolaa koox wiilal ah oo hoy la'aan ah. Waxay soo dhaweeyeen maalin kasta sidii ay u timid. Subax subxaha kamid ah, wiilasha ayaa darimahooda laablaabanayay ka dib ku seexashadi wadada qaboow qarkeeda. Si aay isaga kiciyaan qabowga waxay shiteen dab qashin lagu shiday. Kooxdan wiilasha ah waxaa ka mid ahaa Magozwe. Wuxuu ahaa kan ugu yar.



Markii waalidkii Magozwe dhinteen, wuxuu ahaa shan sano jir. Wuxuu aaday adeerkii si uu ula noolaado. Ninkani ma daryeelayn ilmaha. Ma uusan siiin Magozwe cunto ku filan. Wuxuu ka yeelay wiilka in uu qabto shaqo badan oo adag.




Haddii Magozwe uu ka cawdo ama su'aalo, adeerkiis ayaa garaaci. Markii uu Magozwe weydiistay inuu iskuul aadi karo, adeerkiis ayaa garaacay oo ku yidhi, "Aad ayaad nacas u tahay in aad wax barato." Saddex sano oo loola dhaqmayay Magozwe waa uu ka cararay adeerkii. Wuxuu bilaabay in uu ku noolaado waddada.




Magozwe wuxuu fadhiyay deyrka gurigii saqafka cagaara, akhrisanayo sheeko buug oo dugsigaa. Thomas baa u yimid oo soo ag fadhiistay isaga. "Maxay sheekada ku saabsantahy?" waxaa weydiiyay Thomas. "Waxay ku saabsan tahay wiil yar oo macallin noqday," ayuu yiri Magozwe. "Waa maxay magaca wiilka?" waxaa weydiiyay Thomas. "Magaciisu waa Magozwe," ayuu yiri Magozwe isaga oo dhoola cadeynaya.




Nolasha waddadu way adkayd, badankoodna
wilasha waxa ay maalin walba la halgamayay si ay
cunto u helaan. Mararka qaar kood waa laxirayay,
mararka qaar kood waa la garaacaayay. Markii ay
xanuunsadaan, ma jirin cid caawisa. Kooxdu waxay
ku tiirsanayd lacagta yar ee ay tuugsiga ku soo
helaan, iyo iibinta caagadaha iyo dib-u-
warshadaynta kale. Noloshu waxa ahayd mid sii
adag sababtoo ah dagaalo lala galo kooxo cadow
ah oo rabo in ay maamulaan qeybo kamid ah
magaalada.



Magozwe wuxuu bilaabay dugsiiga, waxayne ahayd
mid adag. Waxaa u yaalay wax badan in uu la
qabsado. Mararka qaar wuxuu doonayay in uu iska
daayo. Laakiin wuxuu ka fekeray duuliyihii iyo
ciyaaryahankii kubadda cagta ee buugta
sheekooyinka. Sida iyaga oo kale, ma usaan is
dhiibin.




Maalin maalmaha ka mid ah markii uu Magozwe fiirinayay weelka qashinka lagurido, wuxuu helay buug sheeko oo gaboobay oo dildilaaacsan. Waxuu ka nadiifiyey wasakhdii waxuuna ku ritay jawankiisa. Maalin walbo malintaa kadib wuxuu soo bixin jiray buugga oo eegi jiray sawirada. Ma uusan aqoonin sida loo akhriyo ereyada.





Oo sidaas daraaddeed Magozwe wuxuu dagay qol guri saqaf cagaaran. Wuxuu qolka la wadaagay laba wiil oo kale. Guud ahaan waxaa jiray toban carruur ah oo ku noolaa gurigaas. Eedo Cissy iyo ninkeeda, seddex eey, bisad, iyo ri duq ah.

Wuxuu lawadaagay cabsidas Thomas. Muddo ka dib
ninkii ayaa ku booriyay wiilka in noloshu ku fiicnaan
karto meesha cusub.




Sawirada waxay sheegi jireen sheeko wiil
weynaaday sii u noqdo duuliyey. Magozwe wuu
maalin riyaan jiray isagoo ah duuliyey. Mararka qaar,
waxuu niyaysan jiray in uu yahay wiilka sheekada ku
jiro.







Waxay ahayd qabow, Magozwe waxa uu markale taagnaa wadada asagoo tuugsanayo. Nin baa xagiisa u soo dhaqaaqay. “Helo, waxaan ahay Thomas, waxaan ka shaqeyaa meel halkan u dhow, oo aad ka heli karto wax aad cunto,” ayuu yiri ninkii. Waxa uu tilmaamay guri jaale ah oo leh saqaf buluug ah leh. “Waxaan rajeynayaa in aad halkaas aadi doonto si aad u hesho cunto?” ayuu weyddiiyay. Magozwe wuxuu eegay ninkii, ka dibna guriga. “Waa laga yaabaa,” ayuu yiri, wuuna ka dhaqaaqay.



Magozwe wuxuu ka fakaray meeshan cusub, iyo aadista iskuulka. Maxaa dhacaya haddii uu adeerkiis saxsana oo uu ahaa asaga mid aad u nacas ah inuu wax barto? Maxaa dhacaya haddii ay ku garaacaan meeshan cusub? Wuu cabsaday. “Waxaa laga yaabaa in ay ka wanaagsan tahay inaad ku sii noolaato wadada,” ayuu ku fakaray.




Biliih!! ka dambeeyey, wiilashii hooy la'aanta ahaa waxay la qabsadeen araga Thomas meelaha ka dhow. Wuxuu jeclaa in uu la hadlo dadka, gaar ahaan dadka ku nool wadooyinka. Thomas wuxuu dhageystay sheekooyinka noolasha dadka. Waxa uu ahaa mid aad u daneeyo una dulqaato, marnaba ma ahayn mid kibro ama ixtiraam daran. Qaar ka mid ah wiilasha waxay bilaabeen in ay aadaan guriga jaalaha iyo buluuga ah si ay cunto u helaan duhurnimadii.



Maalintii tobnad dhalashada Magozwe wuxuu Thomas siiyey buug sheeko oo cusub. Waxay ahayd sheeko ku saabsan wiil yar oo tuulo joogay oo koray si uu u noqdo ciyaaryahan caan ah. Thomas wuxuu sheekadaas u akhriyey Magozwe marar badan, ilaa hal maalin ayuu yiri, "Waxaan u maleynayaa inay tahay waqtigii aad tagtay dugsiga aadna baratay si aad u akhrido. Maxaad u maleynaysaa?" Thomas wuxuu sharxay inuu oga meel ay carruurtu joogi karaan, oo aadaan dugsii.



Magozwe wuxuu fadhiyay wadada qarkeeda isaga oo eegaya sawirka buugiisa markuu Thomas soo fadhiistay agtiisa. “Maxay sheekada ku saabsantahay?” ayuu Thomas weydiiyay. “Waxay ku saabsan tahay wiil yar oo noqday duuliye,” ayuu Magozwe ku jawaabay. “Waa maxay magaca wiilka?” ayuu Thomas weydiiyay. “Ma aqaan, ma aqrin karo,” ayuu Magozwe si hoos ah u yidhi.



Markii ay kulmeen, Magozwe wuxuu bilaabay in uu sheekadiisa u sheego Thomas. Waxay ahayd sheekadii adeerkiis iyo sababta uu ooga soo tagay. Thomas lama hadlin wax badan, mana u sheegin Magozwe waxa uu sameyn lahaa, laakiin marwalba wuxuu u dhageystaa si taxadar leh. Mararka qaark way hadli jireen markii ay ku cunaayan guriga leh saqafka buluugga ah.